# Waa salaaman tahay! Waa arrin lagu farxogo`aanka bilaabista dhigashada dugsiga dadka waawayn Komvux.

Waa arrin lagu farxo go`aanka bilaabista
dhigashada dugsiga dadka waawayn Komvux.

csn

# Anagu waxaan heegan u nahay qofka adiga oo kale ah oo wax barto.



Waa salaaman tahay, magacayga waa Fanny waxaanan ka shaqeeyaa Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN]. Waxa aanu nahay hay´ad dowladeed oo aad taageero-dhaqaaleed ka heli karto, oona ka amaahan karto markii aad wax baranayso. Waxaad dooran kartaa inaad taageero-dhaqaaleed oo kaliya codsato, laakiin sidoo kale waxaad qaadan kartaa deyn. Daynta waa lacag aad dib u bixi doonto markii aad waxbarashadaada dhammaysato.

Aniga iyo hawlwadeneyada kale waxaan diyaar u nahay in aan su'aallahaaga ka jawaabno. Faahfaahinta xiriirka waxay ku qoran tahay bogga ugu dambeeyo.

## Ma ku talo jirtaa inaad Hay'adda arrimaha waxbarashada lacag ka codsato CSN?

Naseexooyinka goorta aad codsanayso:

- Codso dhammaan waxbarashadaada isku mar, ilaa hal sano markiiba.
- Buuxi heerka saxda ah ee waxbarashadaada, koorsooyinka Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ama dugsiga sare.
- Hubso taariikhda bilowga, taariikhda dhammaadka iyo inta dhibcood ee lagu xisaabin doono. Haddii kale, waxaa dhici karto in lagu siiyo lacag aadan xaq ku lahayn ama aad u yar.

Sawir koodka-QR ka qaad sidii aad u daawan lahayd filinka lagu tilmaamo qaabka codsiga loo buuxiyo. Qoraallada hoos waxaa lagu soo turjumay af-iswiidish, af-ingriisi, af-bersi, af-soomaali iyo af-carabi.
**www.csn.se/languages/af-soomaali-somaliska**

## Muddada aad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] xiriir la leedahay:

Waa inaad tixraacdo talaabooyinka kala duwan – laga bilaabo codsashada ilaa aad waxbarashada ka dhammaysato

1. Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] u soo dir codsigaa taageero-dhaqaaleed waxbarashada iyo daymaha waxbarashada.
2. Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] way oggolaatay codsigaaga.
3. Bangiga Swedbank wargeli lambarka akawntiga.
4. Haddii go'aankaaga u sax yahay, u soo dir Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] caddaynta waxbarashada. Haddii kale ogeysii isbeddelka.
5. Maamulka iskuulka wuxuu Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] wargelinayaa inaad waxbarashada bilaawday.
6. Lacagtii ayaa lagu soo dirayaa.
7. Haddii xaaladdaada wax iska bedelaan – waa inaad hay`adda la socodsiisaa!
8. Markii waxbarashada aad dhammaysato waxaa la joojinayaa lacagbixinta.
9. Haddii aad dayn qaadatay, waxaad dib u bixinta daynta bilaabaysaa ugu danbayn 6 bilood kaddib markii aad dhamayso waxbarashadaada.

**Waxbarasho inaad bilaawdo miyaa haddana go`aansatay?**
Hay`adda u soo dir codsi cusub dib ugu laabo tallaabada 1:aad.

## Intee lacag ayaa lay soo diri doonaa?

Inta lacagta lagu soo diri doono waa hadba haddii kaalmo-dhaqaaleed oo kaliya qaadanayso, ama haddii xitaa dayn qaadan doonto. Waxay kaloo ku xiran tahay dhawr qodob oo kale, tusaale:

**Heerka waxbarashada -** inta dhibcood ee aad waqti go'an dhigan doonto.

**Dakhligaaga -** markii aad wax baranayso dakhli kale waa yeelan kartaa laakiin ilaa xad. Xadkaas waxaa loo yaqaanna fribelopp. Haddii dakhligaaga u ka badan yahay fribelopp-ka, malagu siinayo in la le'eg oo taageero-dhaqaaleed iyo daynta.

**Haddii aad carruur leedahay -** haddii aad tahay xilhaayeha xannaanadda waxaad codsan kartaa gunno taageero-dhaqaaleed oo dheeraad ah.

**Haddii aad shaqayn jirtay -** haddii aad dakhli lahaan jirtay kahor inta aadan bilaabin waxbarashada, waxaad laga bilaabo markaad 25 sano buuxsato codsan kartaa dayn dheeraad ah.

**Taageero-dhaqaaleed sare -** haddii aad xaq u leedahay taageero-dhaqaaleed dheeraad ah, toos ayaa lagugu soo diri doonaa. Waxay ku xiran tahay tusaale da'daada iyo waxbarashadii hore.

Lacagaha Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] waxaa la qaata waqti xadidan. Tan kale, si marka ku xigta lagu siiyo lacagaha waa inaad ku soo guulaysatay dhigashada dhawr dhibcood.

Haddii sawir aad koodka-QR ka qaado, waxaa ku soo ifbixi doono lacagta lagu soo diri doono.
**www.csn.se/languages/af-soomaali-somaliska**

## Haddii xaaladdaada wax iska bedelaan – waa inaad hay`adda la socodsiisaa!

Haddii xaaladda waxbarashada wax isa iska bedelaan noola socodsii waan ka caawini doonaa. Sidaas ayaa ugu hortegi kartaa in lagu siiyo lacag aadan xaq ku lahayn, oona kaddib ku qasban tahay inaad dib u bixiso. Xaaladdaan waxay dhici kartaa, tusaale ahaan, haddii aad:

- Dhigato dhibco ka yar ama aad kororsato tira da koorsooyinka.
- Joojiso ama hakiso waxbarashadaada.
- Ku soo galan lacag ka badan Fribelopp
- Guriga ku daryeeli jirtay ubad ka xannuunsana (VAB).

Ma adiga xannuunsana mise ubad xannuunsan ayaa daryeelaysay? Xaaladdaas waa in sida ugu dhakhsaha badan wargeli laga heelo, door bidaan maalinta ugu horeysa. Waayo muddada aad xannuunsan tahay waxaa dhici karto in aan laga jarin wax lacag ah ama daymaha aad qaadato, xataa haddii aanad waxba baran karin.

- Haddii aad xanuunsato waa in aad wargelisa Khasnadda caymiska bulshada.
- Haddii ubadkaaga u xannuunsado, waa inaad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] wargeliso.

Haddii isbedellada aadan Hay'adda arrimaha waxbarashada wargelin, waxa laga yaabaa inaad dib u soo celiso lacagaha oo lagu biiriyo dulsaar iyo kharashyo 30 maalmood gudahood.

Isbeddelada waxaad hay`adda ku wargelin kartaa Mina sidor **csn.se**

## Ma wax baa jira oo si fudud loo fahmayn?

Badi waxaa noola waydiiyay macnaha ereyada qaarkood. Sidaas awgeed, naga guddoon liis u ku qoran yahay macnaha ereyada.

**Ansökan** – Waa codsiga aad u soo dirto Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] oo aad ku codsanayso in lagu siiyo taageero-dhaqaaleed ama lacag dayn oo aad wax ku barato.

**Avslag** – Waa ereyga diidmada codsiga aad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] u qoratay. Go'aan – Waa jawaabta codsigaaga oo qoraal ah oo lagugu wargelinayo haddii codsigaaga ay CSN oggolaatayiyo in kale.

**Beviljad** – Waa aggolaanshada codsiga aad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] u qoratay in lagu waxbarasho darteed lacagaha lagu siiyo.

**Bidrag** – Waa lacagaha taageero-dhaqaaleedka lagu siin karo markii aad wax baranayso oona u baahnayn inaad dib u bixiso.

**Bidragsbrott** – Waa markii ugu talagal ahaan aad xog aan sax ahayn siiso Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN], ama aadan wargelin wixii isbeddel ah oona sidaas darteed lagu siiyay lacag aadan xaq ku lahayn. Dhammaan falalka khiyaanada waxaa la wargeliya ciidan booliska.

**Fribelopp** – Macnaha waxaa weeyaan heerka ugu sareeyo ee dakhliga nus sannadeed. Haddii dakhligaaga u ka badan yahay Fribelopp, lacagaha Deqda/deynta waxbarashada ma badna. Inkomst – Waa dakhliga ku soo gala, tusaale ka soo gala shaqada (mushahar), Lacagta waali-diinta, Khasnadda caymiska shaqolaaweyaasha, ganacsi ama faa`iidada iibinta guri ama saami.

**Kalenderhalvår** – Waa muddada u dhaxayso 1 jannayo – 30 juunyo iyo 1 luulyo – 31 diseembar.

**Lån** – Deynta waa daynta aad amaahatay waxbarashada darteed, taasoo waajib kugu ah inaad dib u bixiso.

**Dhibcaha** – Koorsooyinka oo idil waxay leeyihiin dhibco oo lagu tilmaamayo weynaanta koorsada.

**Dulsaar** – Kharashka aad bixinayso haddii aad lacag ka daynsato CSN.

**Studieförsäkran** - Waa markii Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] aad ka ballan qaadayso in aad wax u baran doonto hab waafaqsan dhibcaha lacagaha lagugu siin doono, iyo inaad hay`adda wargelin doonto haddii wax is-beddelaan. Ballan qaadka waxaad hay`adda ugu soo gudbin kartaa qaab digitaal ama boostada.

**Studiemedel** - Waa magaca wadareed ee deeqaha iyo daymaha waxbarashada ee Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] bixiso.

**Studietakt** - Waa cabbir lagu muujiyo celcelis ahaan heerka inta dhigatay muddo cayiman. Deqda/deynta waxbarashada waxaa la bixin karaa boqolkiiba 50%, 75% ama 100% (waqti buuxa). Komvux waa wakhti buuxa ahaan todobaadkii loo xisaabiyaa 20 dhibcood.

**Återkrav** - Dib u soo cesho – Waa lacagaha laga rabo inaad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] dib ugu bixiso maadaama aadan xaq ugu lahayn, waa in 30 maalmood gudahood dib u bixisaa.

CSN nr 2447B/2402

## Ma doonaysaa inaad noola soo xiriirto?

Booqo csn.se/languages/af-soomaali-somaliska ama ka wac 0771-276 000.